



Ref: CSC/XG/KDQ/01-24 /2018.

Date: 16/08/2018

Ku: Guddoomiyaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka JSL
OG: Siciid Yuusuf Jaamac JSL
OG: Daahir Cawaale Jaamac JSL
OG: Guddoomiyaha Maxkamada Sarre JSL
OG: Madaxweynaha JSL

Uj: Jawaab Celin .

Mudane Guddomiye,

Salaan badan kadib, aniga oo tixraacaya waraaqdaada sumadeedu tahay KDQ/XK/108/2017 ee ku taariikhaysan 17/09/2017 nuxurkeeduna ahaa Shaqaale lagu sameeyey shaqo ka eris. Kuwaas oo ka hawl-galayey xarunta komishanka Doorashooyinka Qaranka

Kadib markii aan arkay in qodobada aad shaqo ka eristooda u cuskateen aanu ahayn sharciga shaqaalaha dawladda Sharci Lr. 07/96 qodobkiisa 28^{aad} kaasi oo qeexaya hanaanka shaqo ka saarista shaqaalaha dawladda balse aad u cuskateen Xeer Lr. 20/2001 ee xeerka doorashooyinka madaxtooyada iyo goleyaasha deegaanka qodobka 15^{aad} faqradiisa 3^{aad}


Kadib markii ay mudo badan dhexdeena ka jirtay is-maandhaaf dhanka is waafajinta labada xeer Sharci Lr. 07/96 iyo Xeer Lr. 20/2001 ee dhanka qorida iyo shaqo ka saarida shaqaalaha komishanka doorashooyinka qaranka

Waxa aan halkan idiinku soo gudbinayaa go'aanka guddida Hay'adda Shaqaalaha Dawladda:

- 1- Mar hadii aydaan shaqo ka erista shaqaalahaan u soo cuskan sharciga shaqaalaha dawladda **Sharci Lr. 07/96** kaasi oo qodobkiisa 28^{aad} si cad u qeexayo hanaanka loo marayo shaqo ka saarista shaqaalaha joogtada ah, balse aad u soo cuskateen **Xeer Lr. 20/2001** ma jirto sabab aad hay'adda shaqaalaha dawladda ugu soo gudbisaan codsiga shaqo ka erista shaqaalahaan magacdoodu kor ku xusan yihiin.
- 2- Inta si sifo sharci ah shaqaalahaan shaqada looga saarayo Hay'adda shaqaalaha dawladdu waxa ay u aqoonsan tahay labada shaqaale ee magacdoodu kor ku xusan yihiin shaqaale aan weli shaqada looga saarin si buuxda
- 3- Ugu dambayn, inta xal waara laga gaadhayo is-waafajinta labada sharci ee kala ah; **Sharci Lr. 07/96** iyo **Xeer Lr. 20/2001** ee qaybta **shaqaalaynta**, waxa ay hay'adda shaqaalaha dawladdu si kumeel gaadh u hakisay wada shaqayntii ay la lahayd Komishanka Doorashooyinka qaranka ee dhanka
 - 1) Dilwaangelinta
 - 2) Shaqaalaynta,
 - 3) Dalacaada
 - 4) Xaqsiinta
 - 5) Tababarka
 - 6) hawlgabka
 - 7) Anshax marinta iyo guud ahaanba maaamulka iyo maaraynta shaqaalaha komishanka doorashooyinka qaranka

F.G- Hay'adda Shaqaalaha dawladdu waxa ay Gudoomiyaha Maxkamada sarre **Proff: Adan X. Cali Axmed** oo waraaqdani si dadban ugu socoto si sharaf le uga codsanaysaa in uu tafsiir sharci ka soo saaro labada sharci ee **Sharci Lr. 07/96** iyo **Xeer Lr. 20/2001** kaasi oo qodobkiisa 15^{aad} faqradiisa 3^{aad} ka hadlayo hanaanka xulashada iyo shaqa ka saarista shaqaalaha Komishanka Doorashooyinka Qaranka.

Allaa mahad leh



Md. Sharmaarke Axmed Muxumed Geelle

Gudoomiyaha Hay'adda Shaqaalaha Dawladda JSL

